

Taariikhaha dhaqan galka ayaa kala duwan, laga billaabo Luuliyo 1, 2020

Shaqada Office of Labor Standards (OLS, Xafiiska Heerarka Shaqaalaha) waa in la hormariyo heerarka shaqaalaha ayadoo la adeegsanaayo wada shaqayn waxtar ah oo lala yeesho bulshada iyo ganacsiyada, hormarinta xeer xoojin iyo hal abuur leh, ayadoo muhiimada la siinaayo sinaanta bulshada iyo isirka.



Boorka waa in lagu dhajiyaa meelo loo jeedo oo goobta shaqada kamid ah, asagoo ku qoran af Ingiriis iyo luuqadaha ay ku hadlaan shaqaaluhu. Office of Labor Standards (OLS, Xafiiska Heerarka Shaqaalaha) wuxuu siiyaa adeegyada turjumaada iyo fasiraada luuqada iyo caawimaado dadka naafada ah.

2024 Ogaysiiska Xaquuqaha Shaqaalaha Hudheelka

SMC 14.26

Kahortaga Rabshada

WUXUU KA DIFAACAA SHAQAALAHA RABSHADA AMA AMA FALALKA DHIBAATAYNTA AH EE AY GAYSTAAN DADKA MARTIDA AH

SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya ee ka shaqeeya hudheelada leh 60 qol ama ka badan

SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:

- Inay helaan batoonada cabsida markay ka shaqaynaayan ama ay adeeg u gaynaayan qol hudheelka uu ka dagan yahay qof marti ah
- In lagaa difaaco rabshada ama dhibaatada ay gaystaan martida hudheelku
- Inay usoo sheegaan rabshad ama dhibaatayn uu gaynsaanyo qof marti ah qofka ay u shaqeeyaan
- Inaan loo dhiibin shaqo ama inay adeegyo u geeyaan qolka martida haddii la caddeeyay in qofka martida u ah hudheelka ee qolkaas joogo uu dhibaato u gaysanaayo

SHAQAALUHU KA BADBAADAY RABSHAD AMA DHIBAATO U GAYSTAY QOF MARTI AH, WUXUU XAQ U LEEYAHAY:

- In loo diro aag kale oo shaqo oo uu doorto
- Inuu helo waqti uu mushaar ku qaadanaayo oo dhan ilaa 16 saacadood oo uu la hadlaayo laamaha sharciga iyo qof taageero siiya oo shaqaaluhu dooranaayo
- Inuu helo King County Sexual Assault Resource Center (Xarunta Khayraadka Caawimaada Weerarka Galmada ee Degmada King) si uu helo adeegyada taageerada, iyo/ama u gudbinta adeegyada kale WAC (Laynka 24 saac shaqeeya): 1-888-998-6423
- Inuu helo u doodaha dhibanaha fal danbiyeedka sida ku cad Xeerka Wax laga Badelay ee Washington 7.69.030

SMC 14.27

Xadiyada tirada shaqada

WUXUU YARAYNAYAA CADADKA SHAQADA NADIIFINTA

SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya ee nadiifiya qolalka hudheelka leh 100 qol ama ka badan ee martida

SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:

- Inay nadiifiyaan ugu badnaan 4,500 iskuweer fiit ee qolalka martida 8 saacadood maalintii (oo horay loogu qiimeeyay saacado intas ka yar)
- Inay diidaan inay nadiifiyaan wax ka badan aaga ugu badan ee la ogolyahay inay nadiifiyaan
- Inay helaan mushaar 3x ka badan mushaarkooda caadiga ah markay nadiifiyaan aag ka badan mid laga rabo (inta badan xaaladaha jira)

SMC 14.28

Helitaanka daryeelka Caafimaadka

WUXUU KA DOONAYAA LOO SHAQEEYAASHA INAY BAXSHAAN QARASHAADKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya ee shaqeeya celcelis dhan 80 saacadood ama ka badan bishii kana shaqeeya hudheelada leh 100 qol ama ka badan. Ma quseeyo kormeerayaasha, maamulayaasha, ama shaqaale gaar ah kuwaasoo gacan ka gaysta go'aaminta xeerarka maaraynta ee la xariira xariirada shaqada.

SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:

- Inay helaan daryeel caafimaad oo hormarsan ayna ku helaan qarashaadka daryeelka caafimaadka ee laga doonaayo shirkada ay u shaqeeyaan
- Shirkadaha loo shaqeeyo ayaa qarashka ku bixin kara mid ama labo kamid ah qaababka soo socda:
 - lacagaha dakhliga caadiga ah
 - lacagaha lagu bixiyo qorshaha caymiska caafimaadka ee shirkada loo shaqeeyo bixiso, iyo/ama
 - lacagaha lagu bixiyo caymisyada caafimaadka ee canshuurta laga jaro (tusaale, koontooyinka kaydka caafimaadka)

2024 QIIMAYAASHA [†]	
Qarashka Bilaha ah	Xubnaha Qoyska
\$530	Shaqaaale Kaligiis ah
\$902	Shaqaaale kaligiis ah oo dad masruufa
\$1,062	Shaqaalaha leh lamaanaha/xaaska, aana ahayn mid qof ku tiirsan
\$1,592	Shaqaalaha leh lamaanaha/xaaska iyo dad uu masruufo

[†]Qiimayaasha sanad kasta ayaa lagu dhawaaqaa ugu danbayn Juun 30 keeda sanadka hore

Haddii shirkada loo shaqeeyo bixiso caymiska caafimaadka, sharciga ayaa dhaqan galaaya taariikhda diiwaan galinta koobaad ee shirkada loo shaqeeyo furan tahay oo dhacda kadib Luuliyo 1, 2020.

SMC 14.29

Joogtaynta Shaqada

WUXUU QASAB KA DHIGAYAA IN SHAQAALUHU AYSAN SHAQADA DHUMIN KADIB MARKA MULKIILAHA GANACSIGU ISBADELO

SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya oo ka shaqeeyay hudheel leh 60 qol ama ka badan ugu yaraan 30 maalmood kahor intaan ganacsiga la iibin. Ma quseeyo kormeerayaasha, maamulayaasha, ama shaqaale gaar ah kuwaasoo gacan ka gaysta go'aaminta xeerarka maaraynta ee la xariira xariirada shaqada.

SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:

- In la ogaysiiyo in mulkiyada ganacsiga la badelaayo
- Siinta boos shaqo oo qoraal ah oo uu baxsho mulkiilaha cusub (oo lagu baxsho kala saraynta shaqaalaha)
- Sagaashan maalmood oo ay lasii shaqeeyaan mulkiilaha cusub, ilaa inay jirto maahee sabab sax ah oo shaqaalaha loo cayrsho ama ay jirto baahi la xariirta in shaqaalaha shaqada laga saaro (shaqo ka cayrin ku dhisan sida shaqaaluhu u kala sareeyaan)
- Qiimaynta dadaalka shaqada 90 maalmood kadib

Baro Xaquuqdaada Shaqaalaha

AARGOOSIGU WAA MAMNUUC. Sharciyadaan waxay ka difaacayaan shaqaalaha aargoosi ku aadan inay raadsadeen ama ku dhaqmeen xaquuqdooda sharci.

XAQA GUDBINTA CABASHADA: Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay cabasho u gudbiyaan OLS ama dacwad sharci ah gudbiyaan haddii qofka ay u shaqeenayaan jabiyo sharciyadaan.

Cidda lala xariiraayo:
OFFICE OF LABOR STANDARDS

Loo shaqeeyaasha
Hel caawimaada ku dhaqanka sharciga iyo/ama gal tababar

Shaqaalaha
U gudbi cabasho xafiiska OLS ama dacwad u gudbi maxkamada

206-256-5297
www.seattle.gov/laborstandards